

MACLUUMAADKA AMMAANKA WADDADA

ADIGA AYAA MAS'UUL KA AH AMMAANKA CARRUURTAADA MARKAY U SOCDAAN AMA KA SOO SOCDAAN DUGSIGA.

Inay u wataan baaskiilka si ammaan ah

Maaddaama ay carruurta yaryar ay wali sii korayaan xirfadaha looga baahan yahay inay keligood wax wadaan, meesha ugu nabdoon ee lagu wadi karo baaskiilada, mootooyinka iyo shaatiinka waa meelaha deyrka leh.

Ilaa inta carruurta ka gaarayaan 10 sano waa inaysan raacin baabuurta am aka bixin dariiqa baabuurta marto. Maaddaama ay baranayaan inay wadaan baaskiilka waxaa muhiim ah in la raaco ama lala socdo iyagoo lagala hadlayo sida loo noqdo baaskiil wate nabdoon.

Carruurta da'doodu u dhaxayso 10 sano iyo 12 sano waa inay ka raacin waddooyinka mashquulka ah.

Carruurta da'doodu ka yar tahay 16 iyo dadka waawayn ee raacaya oo kormeeraya ayaga waa inay ka fuulaan dhinaca lugta, haddii aysan jirin calaamado khaas ah oo ka mamnuucaya baaskiil-wadida.

Bar carruurtaada si ay u noqoto baaskiilad wate nabdoon adigoo mar waliba ku adkaynaya:

- inay raacaan shuruucda waddada oo ay ka mid yihiin:
 - ka fuul dhinaca bidixda ee waddada lugta
 - dadka lugaynaya sii xaqa inay maraan waddooyinka lugta
 - iska ilaali baabuurta gelaya ama ka baxaya dariiqyada guryaha
- si fiican uxiro koofiyada baaskiil ku haboon – sidaas waa sharci
- xiro dharka midabka dhalaalaya leh sida festiga si dadka kale ee adeegsada waddooyinka kuu arki karaan.

Carruurta waaweyn, si taxadar leh uga feker waxyaabaha soo socda markaad go'aansatid inay karti u leeyihiin inay keligood wax wadaan:

- Sidee ammaan u tahay waddada safarka?
- Sidee yihiin xirfadahooda wadidda?
- Sidee bay uga warqabaan hareerahooda ee beya'dda gaadiidka leh?
- Sidee bay u wanaagsan tahay maareyntooda khataraha aan la filayn?

Dugsigaagu wuxuu leeyahay nidaam ku saabsan ardayga keenaysa baaskiilada goobta dugsiga. Hubso in carruurtaadu inay raacaan nidaamyadaas marwalba.



Wixii taageero dheeraad ah

Ka-qaybgal barnaamijka Waxbarashada Ammaanka Waddada ee Wasaaradda
<https://education.nsw.gov.au/road-safety-education> ama ka eeg
<https://education.nsw.gov.au> oo baar waxbarashada ammaanka waddada.